

# Isbedelada qorshaha diiwaangelinta

## Macluumaadka loogu talagalay qoysaska

## Waa maxay sababtaad u dooratay waxbarashada dawlada?

Nidaamka waxabarashada dawlada ee NSW waxay siisaa dhammaan ardayda waxbarasho heer caalami ah, iyadoo loo diyaarinayo carruurta maanta inay guuleystaan oo ay dhisaan bulshooyinka ka fiican sidan berri. Oo ah bexinta waxbarasho tayo sare leh oo buuxda iyo oo aan laga hor imaneynin lehna fursadaha manhajka sayniska ah, tignoolajiyada, Injineering, xisaabta, fanka, cayaaraha iyo wixii ka sareeya, dugsiyadeena kala duwan iyo dugsiyadeena dawlada ee lagu wada jiro waxay taageeraan arday kasta inuu gaaro meeshuu gaari karo ee ugu sareysa.

## Waa maxay qorshaha diiwaangelintu?

Qorshaha diiwaangelintu wuxuu caawinayaa dugsiyadu inay fuliyaan waajibaadkooda sida waafaqsan Xeerka Waxbarasho ee 1990 (Education Act 1990), iyadoo la hubinayo in dhammaan ardaydu ay heli karaan dugsiga dawlada ee xaafadooda ah. Qorshuhu wuxuu sidoo kale siiyaa macluumaad cad shaqaalaha iyo bulshada oo ku saabsan sida loo maamulo diiwaangelina dugsiyada dawlada ee NSW.

## Waa maxay sababta qorshuhu isu bedelayo?

Wasaaradda Waxbarashada ee NSW waxay la tashatay ka qaybgalayaasha waxbarashada, kooxaha bulshada iyo kooxaha hogaanka dugsiga wax ku saabsan qorshaha diiwaangelinta ee hadda jira. Waxaan helnay natiijo celin aad u balaaran oo ay qoysasku la kulmaan markay isku deyayaan inay iska diiwaangeliyaan dugsiyada dawlada ee NSW. Qorshaha diiwaangelinta la cusbooneysiiyey waxay ka haddashaa waxyaalahaan hor taagan waxayna waafajisaa waxa uga go'an dhismaha iyo sii wadida nidaam dugsi dawladeed oo la heli karo loona siman yahay.

## Waa maxay isbedeladu?

Isbedelada soo socda waxay khuseeyaan dhammaan diiwaangelinta ka bilaabaneysa Teeramka 1 2025.

### Degenayaasha ku meel gaarka ah

Dhammaan ardayda haysta fiisaha deganaanshaha ku meel gaarka ah waxay hadda awoodi doonaan inay iska diiwaangeliyaan dugsiga xaafadooda, oo ku saleysan cinwaanka degaankooda.

Lacagta diiwaangelinta waa laga dhaafi doonaa qoysaska heysta fiisooyinka xirfadadaha sida ku meel gaarka ah ee ku yaraaday gobolada ahna (subclass 482), tusaale, kuwa degan bannaanka Wollongong iyo Sydney.

### Shuruudaha la cusbooneysiiyey ee diiwaangelinta aan xaafadaas ahayn

Dugsiyada dawlada ee NSW waxay leeyihiin goobo diiwaangelin xaafadeed oo khaas ah. Goobaha loogu talagalay in layska diiwaangeliyo waxaa go'aamiyey wasaaradda. Dugsiyadaan waxay hubiyaan inay jiraan boosas ku filan ardayda degan goobta diiwaangelintooda xaafada. Waxaa laga yaabaa inaad codsato inaad ka diiwaangelisid ilmahaaga goob ka baxsan goobtaada loogugu talagalay sidii ahaan 'diiwaangelinta aan xaafada ahayn' haddii boosas la helayo.

Shuruuda la cusbooneysiiyey waxay mudnaanta siineysaa diiwaangelinta aan xaafada deganeyn ee wallaalaha ardayda hadda diiwaangashan, iyadoo mudnaanta la siinayo wallaalaha ardayda ka diiwaangashan fasalada la taageero ee dugsiyada dawlada xaqa u leh.

Sida waafaqsan shuruuda la cusbooneysiiyey, dugsiyada waxay hadda sidoo kale tixgelin karaan diiwaangelinta ardayda aan xaafada degenayn ee ah carruurta shaqaalaha dugsiga.

## Su'aalaha badanaa laysweydiiyo

### Isbedeladaani ma khuseeyaan ilamahaaga?

Isbedelada iska diiwaangelinta dugsiyada dawlada ee NSW way ku khuseeyaan adiga haddii:

- ilmahaagu uu wakhtiga dugsiga gaaray oo uu heysto fiisaha deganaanshaha ku meelgaarka ah, ama
- ilmahaagu wuu gaaray da'da dugsiga wuxuuna leeyahay wallaalo hadda ka diiwaangashan dugsi dawladeed oo ah NSW kana duwan waxaanad jaclaan lahayd inay dhigtaan isku dugsi. Awooda dugsiga inuu aqbalo ilmahaaga diiwaanglintiisa waxay ku xiran tahay shuruuda xaq u yeelashada iyo inay boos hayaan.
- waxaad tahay xubin shaqaalaha ka mid ah dugsiga dawlada NSW ee ka baxsan goobta ilmahaaga loogu talagalay in laga diiwaangeliyo. Awooda dugsiga uu ku aqbalayo diiwaangleinta ilmahaaga waxay ku xiran tahay shuruuda xuquuq u yeelashada iyo inay boos hayaan.

### Dugsi kasta ma laga rabaa inuu ku dhaqmo isbedeladaan?

Dhammaan dugsiyada waa laga rabaa inay ku dhaqmaan isbedeladaan ardayda haysta fiisooyinka deganaanshaha ku meel gaarka ah.

Dugsiyada badidoodu, iyadoo ku xiran awoodooda boos, waxaa looga baahan yahay inay ku dhaqmaan isbedeladaan ardayda isu diiwaangelinaya Teeram 1, 2025

Qorshaha isdiiwaanglinta  ardayda degenaanshaha ku meelgaarka ah heysta waa isbedelaa iyo ardayda aan xaafada deganayn ma saameyn doonto shuruudaha xaq u yeelashada ee goobaha iyo barnaamijyada takhasuska  ah. Dugsiyada leh shuruudaha xaq u yeelashada oo ay ku jiraan dugsiyada xulushada buuxda ah, dugsiyada ujeedooyinka gaarka ah (schools for specific purposes (SSPs)), dugsiyada fogaan wax ku barashada, iyo dugsiyada leh fasalada ama barnaamijyada shuruuradaha xaq u yeelashada gaarka ah (tusaale, fasalada fursada, cayaaraha takhasuska iyo/ama nidaamyada fanka muuqaalka ah) waxay sii wadayaan inay raacaan nidaamkooda diiwaangelinta hadda.

Dugsiyada jinsiga kaliya ay dhigtaan waa inay raacaan isbedeladaan ilaa inta uu ilmahaasi uu fulinayo shuruuda xaq u yeelashada ee jinsigaas. La xiriir dugsiga ay khuseyso oo weydii sida isbedeladaani ay noqonayaan.

### Haddii ilmaheygu uu yahay wallaalka arday hadda diiwaangashan, miyuu codsigooda dugsiga aan xaafada ahayn loo aqbalayaa si toos ah?

Isbedaladaan ma ballan qaadi doonaan diiwaangelinta ilmahaaga ee isla dugsiga dawlada ee aan xaafada ahayn sida wallaalahood. Dugsiyadu waxay mudnaanta siin doontaan diiwaangelinta aan xaafada ahayn ee wallaalaha hadda ka diiwaangashan hadday suurtagal tahay, laakiinse aqbalaada codsigoodu waxaa laga yaabaa inuu ku xiran yahay dugsigu hadduu boos hayo. Kala xiriir dugsiga ay khuseyso wixii macluumaad dheeraad ah.

### Tan micnaheedu ma waxaa weeye wallaalaha oo kaliya ayaa laga aqbali doonaa diiwaanglinta aan xaafada ahayn hadda wixii ka dambeeya?

Maya, weli waxaad codsan kartaa inaad ilmahaaga ka diiwaanglisid dugsi kasta oo dawladeed haddii ilmuhu uu xaq u leeyahay inuu dhigto dugsiga, dugsiguna uu boos u helayo ilmaha. Dugsiyadu waa inay hadda mudnaanta siiyaan oo ay tixgeliyaaan codsiyada iyagoo u eegaya shuruuda diiwaangelinta aan xaafada ahayn ee la cusbooneysiiyey (oo ay ku jirto shuruuda la xiriirta baahida fayo qabka ardayga), ee mudnaanta siiya wallaalaha ardayda hadda ka diiwaangashan iyo tixgelinta carruurta shaqaalaha dugsiga.

### Miyaa si toos ah loo aqbalayaa carruurta shaqaalaha dugsiga ee aan xaafada ahayn?

Maya. Dugsiyada waxay mudnaanta siin doonaan codsiyada wallaalaha aan xaafada degaynayn ee ardayda diiwaangashan, ka dib waxaa laga yaabaa in la tixgeliyo diiwaangelinta carruurta aan xaafada deganeyn ee shaqaalaha dugsiga. Haddii aad tahay xubin ka mid ah shaqaalaha dugsiga, aqbalaada ilmahaaga waxaa laga yaabaa inay ku xiran tahay inuu dugsigu boos hayo. Cusbooneysiinta shuruuda diiwaangelinta aan xaafada ahayn ma saameyn doonaan xuquuqda ilmahaaga si looga diiwaangeliyo dugsiga xaafada.

## Diiwaangelinta ardayda haysata fiisaha deganaanshaha ku meel gaarka ah

**Ilmahaygu wuxuu heystaa fiisaha degenaanshaha ku meel gaarka ah. Hore ayaan u codsaday inaan ka diiwaangeliyo dugsigooda xaafada laakiinse codsiga waa la diiday. Ma diri karaa codsiga diiwaangelinta ee ilmahayga mar kale?**

Dib baad u diri kartaa codsiga diiwaangelinta ilmahaaga haddii ilmahaagu uu heysto fiisaha degenaanshaha ku meel gaarka ah oo codsigoodii hore ee dugsiga xaafada la soo diiday. Fadlan raac tallaabooyinka lagu sharxay qaybta hoose "Sidee baan u bedeli karaa meeshii aan ka diiwaangeliyey ilmahayga 2025?"

**Ilmahaygu wuxuu haystaa fiisaha deganaanshaha ku meel gaarka ah waana u diiwaangeliyey ilmahayga dugsi 2025. Ma bedeli karaa meeshii aan ka diiwaangeliyey ilmahayga?**

Haddii ilmahaagu uu haysto fiisaha deganaanshaha ku meel gaarka ah oo uu haddaba ka diiwaangashan yahay dugsi 2025, waxaad codsan kartaa inaad bedesho meeshay hadda ka diiwaangashan yihiin. Fadlan raac tallaabooyinka lagu sharxay qabta hoose "sidee baan u bedelaa meeshii aan ka diiwaangeliyey ilmahayga 2025?"

**Sidee baan u bedelaa meeshaan ka diiwaangeliyey ilmahayga 2025?**

Waalidiinta ama xannaaneeyayaasha ardayda haysta fiisaha degenaanshaha ku meel gaarka ah waxay u baahan yihiin inay raacaan tallaabooyinkan si ay ugu bedelaan diiwaangelintooda dugsiga xaafadooda:

1. Kula xiriir taleefan kooxda Barnaamijka Degenayaasha Ku meel gaarka ah 1300 300 229 (doorashada 1) ama iimeyl ka tempvisa@det.nsw.edu.au si aad u codsatid bedelka dugsiga ilmahaaga. Waxaa ku soo wargelin doona kooxda Barnaamijka isla marka bedelaada loo dhammeystiro ilmahaaga.
2. La xiriir dugsiga xaafadaada si aad u diiwaangelisid ilmahaaga. Dugsigu wuxuu ku siin doonaa codsi warqad ah oo aad u baahan doontid inaad buuxisid si aadu diiwaangelisid. Ka raadi faahfaahinta xiriirka dugsiga xaafadaada education.nsw.gov.au/find-a-public-school

**Ilmahaygu wuxuu haystaa fiisaha degenaanshaha ku meel gaarka ah ee aan ahayn fiisaha 482. Miyaan u baahan ahayn inaan bixiyo lacagta diiwaangelinta?**

Lacagta codsiga deganaanshaha ku meel gaarka ah iyo lacagta waxbarashada dugsiga si aad dugsiga dawlada aad uga diiwaangelisid waxaa badanaa loo xisaabiyaa iyadoo la isticmaalayo nooca fiisa hoos yimaada ee uu ardaygu heysto. Wixii macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan lacagta laga qaadayo nooca fiisahaaga, fadlan booqo website ka DE International: deinternational.nsw.edu.au/study-options/study-programs/temporary-residents. Haddii aadan weli hubin lacagta in lagaa dhaafo , waxaad kala xiriiri kartaa kooxda Barnaamijka Deganayaasha Ku meel gaarka ah tempvisa@det.nsw.edu.au

# Diiwaangelinta wallaalaha aan xaafada degenayn

**Waxaan codsaday inaan ilmahayga ka diiwaangeliyo dugsiga ay wallaalahood dhigtaan laakiinse codsigooda waa la soo diiday. Mar kale ma diri karaa codsiga diiwaangelinta ilmahayga?**

Haddii aad codsatay inaad ka diiwaangelisid ilmahaaga dugsiga aan xaafadiina ku ool ee wallaalahood dhigtaan oo codsigii la soo diiday, fadlan raac tallaabooyinkan qaybta hoose lagu sharxay "Sidee ayaan u bedelaa meeshaan ka diiwaangeliyey ilmahayga 2025?" si aan mar labaad u diro.

**Waxaan ka diiwaangeliyey ilmahayga dugsi 2025, laakiinse wallaalahood waxay ka diiwaangashan yihiin dugsi ka duwan oo aan xaafada ku oolin. Ma codsan karaa inaan bedelo meeshay ka diiwaangashan yihiin?**

Haddii aad heclaan lahayd inaad u bedeshid dugsiga uu ilmahaagu ka diiwaangashan yahay 2025 isla dugsiga aan xaafada ku oolin ee wallaalahood ay hadda dhigtaan, fadlan raac tallaabooyinkan qaybta hoose ku qoran "Sidee baan u bedelaa meeshii aan ilmahayga ka diiwaangeliyey 2025?"

**Sidee baan u bedelaa meeshii aan ka diiwaangeliyey ilmahayga 2025?**

Waalidiinta ama xannaaneeyayaasha jeclaan lahaa inay ilmahooda ka diiwaangeliyaan isla dugsiga aan xaafada ku oolin sida wallaalahood waxay u baahan yihiin inay raacaan tallaabooyinkan si ay u bedelaan diiwaangelintooda:

## Codsiyada diiwaangelinta online ka ah

1. Gal website ka dugsiga aad dooneysid inaad codsatid diiwaangelintiisa, ka dib guji diiwaangelinta liiska doorashooyinka.
2. Bogga diiwaangelinta, ee ka hooseysa cinwaanka ah sidii aad u diiwaangelin lahayd guji xiriirkaas ee codsiga diiwaangelinta online ka ah.
3. Isla markaad dirtid codsigaaga diiwaangelinta, waxaa laga yaabaa inuu dugsigu inuu ku soo jeediyo ogolaansho oo aad u baahan tahay inaad ku aqbasho 14 maalmood gudahood.
4. Haddii codsigaaga la aqbalo, la xiriir dugsiga ilmahaagu uu hore uga diiwaangashanaa 2025 si aad uga noqotid diiwaangelintaas.

## Codsiyada foomka warqada ah

1. La xiriir dugsiga ilmahaaga waalkii si aad u ogaatid haddii ay awoodaan inay boos siiyaan ilmahaaga.
2. Haddii dugsiga boos u heli karo ilmahaaga, buuxi foom cusub oo codsiga warqada ah, oo dugsigu ku siin karo.
3. Islamarkaad dirtid codsigaaga foomka diiwaangelinta, waxaa laga yaabaa inuu dugsigu ku siiyo boos oo aad u baahan doontid inaad ku aqbashid 14 maalmood gudahood.
4. Haddii codsigaaga la aqbalo, la xiriir dugsiga ilmahaagu uu hore uga diiwaangashanaa 2025 si aad diiwaangelintaas uga noqotid.

**Waxaan diray Aragtidayda inaan Daneynayo (Expression of Interest (EOI)) Fasalka 6 oo 7 u sii gudbayo 2025. Ma bedeli karaa meeshii aan ka diiwaangeliyey ilmahayga?**

EOI ee Fasalka 6 ee usii gudbaya 7 wuu xirmay saa daraadeed waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha intaa wixii ka danbeeya wax bedel ah kuma sameyn karaan liiskooda doorbidida ee 2025.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku bedeshid dugsiga aad ilmahaaga ka diiwaangelisay 2025 isla dugsiga aan xaafada ku ool ee wallaaluhu dhigtaan, waa inaad raacdaa rallaabooyinkan soo socda:

### Codsiyada diiwaangelinta online ka ah

1. Gal website ka dugsiga aad dooneysid inaad codsatid diiwaangelintiisa, ka dib guji diiwaangelinta liiska doorashooyinka
2. Bogga diiwaangelinta, ee ka hooseysa cinwaanka ah sidii aad u diiwaangelin lahayd guji xiriirkaas ee codsiga diiwaangelinta online ka ah.
3. Islamarkaad dirtid codsigaaga foomka diiwaangelinta, waxaa laga yaabaa inuu dugsigu ku siiyo boos oo aad u baahan doontid inaad ku aqbashid 14 maalmood gudahood.
4. Haddii codsigaaga la aqbalo, la xiriir dugsiga ilmahaagu uu hore uga diiwaangashanaa 2025 si aad uga noqotid diiwaangelintaas.

### Codsiyada foomka warqada ah

1. La xiriir dugsiga ilmahaaga waalkii si aad u ogaatid haddii ay awoodaan inay boos siiyaan ilmahaaga. Ka raadi xiriirka dugsiga halkan: education.nsw.gov.au/find-a-public-school.
2. Haddii dugsiga boos u heli karo ilmahaaga, buuxi foom cusub oo codsiga warqada ah, oo dugsigu ku siin karo.
3. Islamarkaad dirtid codsigaaga foomka diiwaangelinta, waxaa laga yaabaa inuu dugsigu ku siiyo boos oo aad u baahan doontid inaad ku aqbashid 14 maalmood gudahood ama sida ugu dhakhsaha badan ee macquul ah.
4. Haddii codsigaaga la aqbalo oo aad aqbashay booska EOI ee lagu siiyey, fadlan si toos ah ula xiriir dugsiga si aad uga noqotid diiwaangelinta.

## Diiwaangelinta carruurta aan xaafada deganeyn ee shaqaalaha dugsiga

**Waxaan codsaday inaan ka diiwaangeliyo ilmahayga dugsiga aan ka shaqeeyo, laakiinse codsigooda waa la diiday. Mar labaad ma diri karaa codsiga diiwaangelinta ilmahayga?**

Haddii aad codsatay inaad ka diiwaangelisid ilmahaaga dugsigaad ka shaqeysid oo codsigii la soo diiday, dib ayaad u diri kartaa. Si aad taas u sameysid, fadlan raac tallaabooyinka ku sharxan qaybta kore ee ka hooseysa "Sidee baan u bedelaa meeshii aan ka diiwaangeliyey ilmahayga 2025?"

### Xaggee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

**Wixii ah weydiimaha diiwaangelinta, la hadal dugsigaad dooratay. Ka raadi xiriirka dugsigaaga halkan: education.nsw.gov.au/find-a-public-school**

**Wixii macluumaad dheeraad ah ee ah sidii aad isaga diiwaangelin lahayd dugsiga dawlada ee NSW: education.nsw.gov.au/enrolment**

**Wixii macluumaad dheeraada ee ah sidii aad isaga diiwaangelin lahayd dugsiga dawlada ee NSW Degane ku meel gaara ahaan: https://www.deinternational.nsw.edu.au/**

**Wixii ah weydiimaha diiwaangelinta guud, kala xiriir xafiiska weyn ee Wasaaradda Waxbarashada: 1300 679 332**

**Adeega Turjumaanka Taleefanka**

Haddii aad u baahan tahay turjubaan kaa caawiya inaad la xiriirtid dugsiga ama Wasaaradda Waxbarashada, fadlan ka wac Adeegga Turjumaan ka 13 14 50 oo weydiiso turjumaan luuqadaada ku hadla. U sheeg xiriiriyaha lambarka taleefanka aad rabtid inaad wacdid ka dibna xiriiriyaha ayaa khadka taleefanka soo gelin doona turjumaan si uu kaaga caawiyo wada hadalka. Adeegan lacag lagaama qaadi doono.